Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka Adeegga Xiriirka Bulshada

# La shaqeynta Nabad Sugidda & Bulshada si loo adkeeyo Iskaashiga iyo Wadashaqeynta

Wasaaradda Cadaaladda Mareykanka, Adeegga Xiriirka Bulshada (CRS) waxay adeeg siisaa hay'adaha nabad sugidda ee federaalka, gobolka, iyo degaanka ee caawiyo in bulshada xalliyaan iskudhaca. Ayagoo isku xeraya si wadahal, dhexdhexaadin, talo siin, iyo tababar, adeegga CRS waxuu ka caaawiyaa dhisda is aaminka iyo xoojinta iskaashiga ee u dhaxeeya nabad sugidda iyo bulshada ay u shaqeeyaan. Iskaashigan waxuu fududeeyaa xallinta dhibaatada iyo xoojinta xiriirka, taasoo yareyso xiisada, caddeynta is faham waaga, iyo xoojinta tayada bulshada degaanka ay ku xalliyaan iskudhac mustaqbalka ah.

**CRS** waxay la shaqaysaa hayadda amniga si loo

hagaajiyo iskaashiga iyo xiriirka udhaxeeya hayadda ammaanka iyo jaaliyadaha kala-duwan si wada-hadal iyo xallin dhibaato ah

**Dhexdhexaadi khilaafka iyo kacsanaanta** kadib dhacdooyinka ismaan-dhaafka, ay kujiraan go'aano sharci ama xukun

**Ka-caawi habeeyayaasha qabashada xaflado ammaan ah** si qorshaysan iyo tababaris xafladaynta

**Hagaaji wacyiga jaaliyadda** xagga sharciga denbiga nacaybka, kahortagga, iyo ka jawaabista

**Hagaaji wacyiga hayadda ammaanka** xagga caadooyinka iyo dhaqanka jaaliyadaha kala duwan ee loo adeego

## Barnaamijyada iyo Adeegayada

### Adkeynta Iskaashiga Boliiska iyo Bulshada, loosoo gaabiyo (SPCP)

CRS waxay fixisaa barnaamij maalin buuxda ah ee isku keena hormuudka bulshada iyo nabad sugidda si wax looga qabto dhibaatada bulshada loona xoojiyo iskaashiga boolika-bulshada. Iskaashiga booliska iyo bulshada waxaa loogu tala galay inuu kordhiyo tayada degaanka uuna horumariyo xalka degaanka u helo dhibtaada degaanka.



Sanford, Madaxa Booliiska Cecil Smith (biddix) iyo Meeyarka Jeff Triplett (dhex) jooga kulan salad jaaliyad 2013 kadib xukunkii Trayvon Martin. CRS waxay kala shaqaysay hayadda amniga, xafiiska meeyarka, iyo hogaamiyayaasha diinta ee Sanford yaraynta isku-horimaad ka dhaca kiiskaas.

(Sawirka waxa leh: Scott Olson/Getty Images)

**Dhexdhexaadin iyo Fududeynta Wadahadalka** Si looga jawaabo muranka ama is aamin darrada soo jireen ka ah ee abuuro xiisad bulshada ah (ka mid tahay sarkaal toogta ama go'aan maxkamadeed), CRS waxay bixisaa dhexdhexaadin iyo adeegyada fududeynta wadahadalka ee nabad sugidda iyo bulshada si looga caawiyo yareynta xiisada, loona badiyo qeybsiga macluumaadka iyo horumarka in lagaaro is afgarad labada dhinac ah.

### Tababarka lagu Caawiyo Nabadeynta Munaasabadda Dadweynaha

Tababarka qabanqaabiyaasha qorsheynaya munaasabadda dadweynaha, sida banaanbaxa. CRS waxay bixisaa qorsheynta diyaar garowga iyo shaqaalaha ilaaliya munaasabadda ee la shaqeeya nabad sugidda degaanka, qorsheeyayaasha munaasabadda, qabanqaabiyaasha bulshada, iyo kuwa kale si loo xoojiyo xiriirka labada dhinac loona yareeyo qatarta rabsho ka dhacdo munaasabadda.

### Dambiyada Naceybka iyo Difaaca Madasha Meelaha Macbadka ah

CRS waxay fududeysaa kalfadhi waxabro oo maalin barkeed meeshaas oo nabad sugda, xeer ilaaliyeshaasha, iyo qubaro ay baraan bulshada sharciyada gobolka iyo federaalka ee dambiyada naceybka, warbixinta, iyo mawduucyada la xiriira. Madal maalin labaad barkeeda ah ee Difaaca Meelaha Macbadka, ayaa waxuu isku keenaa nabad sugidda, hormuudka ururada diiniga, iyo qubaro kale si bulshada loo baro dambiyada naceybka ee abaaro dhismooyinka diiniga ah.

### Tabarada Nabad Sugidda ee Wax ka Ogaashada Bulshada

Dadaalo lagu dhisayo xiriirka u dhaxeeya nabad sugidda iyo bulshooyinka isku dhafka ah ay u adegaan, CRS waxay bixisaa tababarro dhaqanka ah ee bulshooyinka kala duwan. Tababarradan waxaa ka mid ah wada Shaqeynta iyo Dhisidda Iskaashiga Muslimka Mareykanka, wada Shaqeynta iyo Dhisidda Iskaashiga Siingaha Mareykanka, iyo Nabad Sugidda iyo Dadka Sinjiga Badeshay. CRS waxay fududeysaa tababarradan isdhex galka ah ayadoo la kaashaneysa dad qubaro ah.

## Waa Ayo CRS

Waxaa lagu aasaasay sharciga Xuquuqda Shacabka 1964kii (Title X), waxaana lagu sii ballaariyay sharciga Kahortagga Dambiyada Naceybka Mathew Shepard iyo James Byrd, Jr., ee 2009kii. CRS waa “Nabadoonka Mareykanka” u ah bulshada soo wajahday xiisado ama isku-dhac ku saleysan kala duwanaanta midabka, asalka, sinjiga, sinjiga uu sheegto, diinta, iyo naafonimada. Ujeedka adeegyada CRS waa inay kor uqaado awooda bulshada ay si gooni ah iyo wadajir ah uga hortagaan una xaliyaan iskudhac mustaqbalka ayadoo la isticmaalayo sida xalinta dhibaatada, aqoon kordhin, iyo ka shaqeynta xiriirka.

## Adeeyada iyo Barnaamijyada CRS

CRS waxay siisaa bulshooyinka la kulmo xiisad, barnaamijyo gogoldhig u ah fahanka, hagaajinta wadashaqeynta, iyo kahortagga iska hor imaad mustaqbalka. Shaqaalaha CRS waa xirfadlayaal dhexdhexaadiyaal, tababarayaal, iyo la taliyayaal khibrad u leh isku keenka xubnaha bulshada si ay u hagaajiyaan awoodooda xalinta iskudhac jiro iyo ka hortagaan iskudhac mustaqbalka ah.

## Xagee ka Shaqeynaa

**Xarunta CRS**

Washington, DC

**Xafiisyada Gobolada CRS**

**New England**
Boston, MA

**Waqooyi-bari**
New York, NY

**Atlantiga-Dhexe**
Philadelphia, PA

**Konfur-bari**
Atlanta, GA

**Galbeedka-dhexe**
Chicago, IL

**Konfur-galbeed**
Dallas, TX

**Dhexda**
Kansas City, MO

**Buuraleyda**
Denver, CO

**Galbeedka**
Los Angeles, CA

**Waqooyi-galbeed**
Seattle, WA

**Xafiisyada CRS ee Goobaha Shaqada**

Miami, FL
Detroit, MI
Houston, TX
San Francisco, CA




## Naga hel, nagala xiriir

**www.justice.gov/crs**

facebook.com/DOJCRS/ | @DOJ_CRS | askcrs@usdoj.gov | 202.305.2935

Wixii macluumaad dheeri ah ee barjaamijkan ama adeegyada kale ee Adeegga Xiriirka Bulshada: fadlan la xiriir xafiiska deegaankaada: https://www.justice.gov/crs/about-crs/regional-and-field-offices